



## **Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

### **WAR-SAXAAFADEED 026/09**

#### **Ergaygga Gaarka ah ee Xog-hayaha Guud ee Qaramadda Midoobay (SRSG) oo soo dhoaweyay booqashaddii UNPOS ay ku tagtay Soomaliland**

Nayroobi, 4 Sebtembar 2009 – Wefdi ka socda Xafiiska Qaramadda Midoobay u Qaabilsan Arrimmaha Soomaaliya (UNPOS) uuna hogaaminaayo ku-xigeenka Wakiilka Gaarka ah ee Xog-hayaha Guud ee Qaramadda Midoobay, Charles Petrie, ayaa isbuucan booqday Somaliland si uu ula kulmo saraakisha halkaas joogta isaga oo xooga saarayey sidii loo sii wadilaha loona xoojin lahaa hawlaha ay UNPOS ka waddo Somaliland. Wefdigu waxa kale ee uu la kulmay saraakiil ka socota dawladda iyo madaxda kala gedisan ee xisbiyadda siyaasadda iyo wakiilo ka socda bulshada rayadka ah si uu u soo ogaado aragtidooda.

Wefdigu wuxuu hadal wax tar leh la soo yeeshay Madaxweyne Dahir Riyaale Kaahin.

Booqashada wefdiga, gaar ahaan kulanka dhexmaray Madaxweyne Riyaale iyo wefdiga, waxaa soo dhoweeyey Ergaygga Gaarka ah U-Qaabilsan Arrimmaha Soomaliya, Ahmedou Ould-Abdallah oo yiri booqashado iyo kulamadu waxay markhaati u yihiin sida ay Soomalinad uga go’antahay dhaqaaqa ay u dhaqaaqday dhinca nabadda iyo isutanaasulka.

“Soomaliland waxay leedahay taariikh aad u wanaagsan oo ay si nabad-gelyo ku dheehantahay oogu xaliso wixii is-afgarad waa ah ee ka jira dhexdeeda. Waxaana rajaynayaa in isla dhaqankan nabad wax kuxalinta ku fadhiya loo adeegsan doono xalinta caqabadaha hadda jira.”, ayuu yiri Ahmedou Ould-Abdallah.

“Labaatankii sanno ee la soo dhaafay Soomaliland waxay ku taagneed wadadii wada-hadalka waxayna iska diiday waxyaabaha qaska ku fadhiya”, ayuu yiri Ergaygga.” Waxaan rumaysanahay in Soomaliland laga baran karo casharro badan oo ku saabsan sidii loo xalinlaaha khilaafaddka gudaha ama ummadda dhexdeeda ka dhasha.”